















waxay fiirin doonaan dhamaan hawlaha aruurinta munaasabka ah si loo habsado in dhamaan iskudayidda aruurinta iskaa wax u qabdo la fulliyay, iyo in xisaabta buuxisay sharuudaha mudanka.

**Sheegashada Hantida Ma Guuraanka Bukaanka Dhintay kana Dambaynin Xaas Nool:** Waxaa dhici karto in GSEHC ay qaan saarto hantida bukaanka dhintay haddii aysan jirin qof ka haray labada qof isqabta.

Xaaska ka soo hartay bukaanka dhintay, ee qaba biilasha GSEHC ee weli laga rabo, waxaa loo haystaa in ay mas'uul ka tahay bixinta kharashka waajibaadkaas, hase ahaatee GSEHC aysan helin.

## **TABABARKA SHAQAALAHA**

Tababarka shaqaalaha waxaa la siin doonaa shaqaalaha ku hawlan isdhexgalka aruurinta. Shaqaalaha mas'uulka ka ah aruurinta xisabaadka uu qofka iskiisa u bixiyo waxaa la siin doonaa tababar oo ku saabsan adeegga macaamilka, waanwaanta/xallinta iyo xirfadaha aruurinta. Tababarka wuxuu xoogga saari doonaa Kaalmada Maaliyadda GSEHC (GSEHC Financial Assistance) iyo siyaasadaha Biilasha/Arruurinta (Billing/Collection policies) iyo ballan qaadka in dhamaan bukaanka loola dhaqmo naxariis iyo in la ilaaliyo sharafta. Tababarka wuxuu fiirin doonaa qoraalada aruurinta iyo macluumaadka kale ee loo baahan yahay in si dhab ah loo ogeysiyo bukaanka siyaasadaha GSEHC.

## **KORMEERIDA WAKAALADAH A RUURINTA**

Si joogto ah ayaa lool kormeeri doonaa wakaaladaha aruurinta ee ka soo jeeda dhinac saddaxaad una shaqeeya GSEHC si loo habsado in ay u hoggaansamaan siyaasaddaan.

## **SIDA DADWEYNAHA U HELAAN SIYAASADDA**

Macluumaadka ku saabsan Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda (GSEHC Financial Assistance Policy), iyo Siyaasadda Biilasha Qofka Iska Bixiyo iyo Soo Aruurinta (GSEHC Self-pay Billing and Collection Policy) waxaa la siin doonaa bukaanka iyo bulshada ay GSEHC u adeegto iyadoo adeegsanaysa ilo kala duwan. Fadlan fiiri Qeybta Dambe 1 si aad u heshid tafasiil dheeraad ah.

## **HIRGELINTA**

Talaabo kasta oo xumaan ah, kadeedda, luqad marrin habaabin ama dabeecadda aruurinta ee shaqaalaha GSEHC, shaqaalaha wakaaladda aruurinta deynata ama qareenada waxaa wax looga qaban doonaa hababka wax ka qabashada sixidda.

## **QARSOODIGA**

GSEHC waxay badbaadin doontaa qarsoodiga bukaan kasta sida macluumaadka maaliyadda iyo wax ka qabashada macluumaadka caafimaadka qofka.

## **OGOLAASHADA SIYAASADDA**

Siyaasadda kaalmada maaliyadda waxaa la siiyay iyo soo ogolaaday Guddiga Maaliyadda Maamulka GSEHC (GSEHC Governance Finance Committee) 03/12/2024. Siyaasaddaan waa la fiirin doonaa muddo ka muddo. Isbaddal kasta oo la taaban karo laguna sameeyo siyaasadda waa in ogolaasho laga helo Guddiga Dawladnimada GSEHC (GSEHC Governance Board).